

## BOOQASHO UU DANJIRAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYEED EE INDONESIA KU TAGAY JAAMACADDA ISLAAMIGA EE INDONESIA

Maanta oo ay taariikhdu tahay 14 Jaanayo 2009 ayuu Mudane Maxamuud Colow Barow, Danjiraha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia booqasho ku tagay Jaamacadda Islaamiga ee Indonesia oo ku taalo magaalada Jakarta, isagoo kulan shaqo la yeeshay Hormuudka Jaamacadaas iyo Ku Xigeenkiisa arrimaha waxbarashada.



Danjiraha ayaa warbixin faahfaahsan ka siiyay maamulka jaamacadda taariikhda waxbarasho ee Soomaaliya iyo xaaladda ay maanta mareyso waxbarashada dhallinta soo baxayso iyo baahida loo qabo jaamacado tayo leh oo gacan ka siiya Soomaaliya sidii waxbarasho tayaysan loo siin lahaa ardada Soomalieed.

Hormuudka Jaamacadda ayaa soo dhaweeyay booqashada Danjiraha,



kuna tilaamamay mid sare u qaadaysa heerka wax wada qabsi ee labada shacab, gaar ahaan dhanka dhaqanka iyo tacliinta oo ah isha ugu muhiimsan ee laga hago, lagana hormariyo umadaha, wuxuuna cadeeyay inuu diyaar u yahay si walbo oo ay dhallinta

Soomaaliyeed uga faa'iideysan karaan tas-hiilaadka Jaamacadda

Islaamiga ee Indonesia, isagoo carrabaabay in ay leeyihiin qeybo dhowr ah oo ku baxa luqada Ingariiska sida: Islamic Finance, Information Technology, Management iyo International Relation sidoo kale qeybta Shareecada oo ku baxda luqada Carabiga, qeybaha kale ee Jaamacadan oo ay ka mid tahay Nursing, Public Health, Medical Science, Social Science iyo kuwo kale oo dhamaantood ku baxa luqada Indonesia, taas ardada ajaanibta ah loo diyaariyay *preparation courses* oo lagu barayo luqada Indonesia-ka.

Jaamacadan waxaa hadda dhigata arday dhalashadaoodu kala tahay: Thailand, Germany, East Timur, Philippines, Malaysia iyo dabcan wadankan Indonesia oo ay Jaamacadu ku taal.

Kulankan ayuu Danjire Colow ka dalbay maamulka Jaamacadda Islaamiga ee Indonesia in ardada Soomaaliyeed la siiyo tixgelin gaar ah, maadaama ay Soomaaliya marayso xaalad adag oo aanay ardadu awoodin in ay iska bixiyan kharash badan, isagoo Hormuudku ka jawaabayo codsiga danjiraha ayuu wuxuu ballan qaaday in uu arrintaas kulan gaar ah kala yeelanayo maamulka intiisa kale soon saari doonaan go'aan gaar ah oo loogu diyaarinayo ardada Soomaaliyeed qiimo iyo kharash ka gaar ah ardada kale inta ay xaaladda Soomaaliyeed wax iska bedeleyso.

Kulan oo ku soo gebagaboobay is faham iyo taageero buuxdo oo loo



muujiyay ardada Soomaaliyeed, ayay Safaaraddu ku dadaaleysaa sidii loogu fududeyn lahaa ardada Soomaaliyeed ee doonayso inay wax ka barto wadankan Indonesia.

Jakarta 14 Janaayo 2009

[Safaaradda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia](#)  
[Jl. Salak No. 5, Guntur, Jakarta Selatan 12980 Indonesia](#)  
[Email: somaliemb@indo.net.id](mailto:somaliemb@indo.net.id)